

Xaafiska Waxbarashada Sare ee Minnesota

**CODSI BILAASHA AH
OO LOOGU TALAGALAY
GARGAARKA FEDERAALKA
EE ARDAYGA IYO XEERKA
RIYADA MN (MN DREAM ACT)**

2021

A decorative graphic at the bottom of the page consisting of numerous horizontal, wavy lines in a light blue color, creating a textured, water-like effect against the dark teal background.

Waxaad FAFSA ka buuxin kartaa www.fafsa.gov. Sidoo kale waxaa jira qayb wada sheekeysii oo oonleen ah oo looga jawaabaayo su'aalaha ay qabaan ardayda ama waalidiinta inta ay dhameystirayaan FAFSA.

Warbixinta Caawimaada Ardayga, SAR, waa nidaam elektaroonoiga ah oo FAFSA-ga ardayga si toos ah loogu diro ardayga. Ardaygu waa inuu akhriyaa SAR waana inuu sameeyo sixitaan kasta oo muhiim ah.

Xaafiiska caawimaada dhaqaalaha ee kuleejka ayaa kaa caawin kara inuu buuxiso FAFSA aadna ka jawaabto su'aalaha.

Kuleej kasta ood ka fakareyso wuxuu adeegsan doonaa lacagaha laga helo dhammaan ilaha la heli karo si ay kuugu abuurto xirmo gargaar ayadoo lagu saleynaayo u qalmitaankaaga dhaqaale. Dugsiyada qaar waxay haystaan codsi u gaar ah si ay u codsadaan gargaarka laamaha waxbarashada. Fiiri inuu jiro codsi gaar ah iyo waqti kama danbeys ah oo kale.

Halkii aad ka dhameystiri lahayd FAFSA, ardayda aan sharciiyaysneyn waa inay buuxiyaan codsiga Gargaarka Dhaqaalaha Gobalka ee Xeerka Riyada MN ood ka helayo www.ohe.state.mn.us/MNDreamAct

CODSI BILAASHA AH OO LOOGU TALAGALAY GARGAARKA FEDERAALKA EE ARDAYGA (FAFSA)




Deeqaha Gobolka MN Deeqaha Pell


Si aad u codsato gargaarka dhaqaalaha, waa inaad buuxiso Codsiga Bilaashka ah ee Gargaarka Federaalka ee Ardayga, ama FAFSA. FAFSA waxa loo adeegsadaa in lagu codsado Deeqda Gobolka Minnesota, Deeqaha Federaalka ee Pell, Amaahda Tooska ah, iyo gargaarka maaliyadeed ee kale ee laga heli karo dugsiyada gaarka ah. Foomka waxa uu kaa doonayaa inaad soo gudbiso macluumaadka la xariira dakhliga iyo hantida qoyskaaga, iyo xaaladaada arday ka ahaan. Codsigaaga FAFSA-gaaga oo dhammaystiran waxaa laga heli doonaa dhammaan dugsiyada aad dooratay.

Goorma ayay tahay inaad codsado Gargaarka Dhaqaalaha?

Waqtiyada kama danbeysta ah way kukala duwan yihiin barnaamijyada gargaarka dhaqaalaha. Marka ugu horeysa ee aad soo gudbin karto codsiga FAFSA ama Xeerka Riyada MN si aad u codsato gargaarka ku saleysan baahida gobolka iyo federaalka waa Oktoobar 1 deeda sannad dugsiyeedka soo socda. Waa inaad dib u codsato Gargaarka Dhaqaalaha sanad kasta.



Waqtiyada kama danbeysta ah ee Codsiga



Deeqaha Gobolka Minnesota:

Wax aan ka danbeyn 30 maalmood kadib billoowga teeramka

Deeqaha Federaalka Pell:

Dhammaadka sanad dugsiyeedka (Joon 30)

Deeqaha Xarumaha waxbarashada:

Waqtiga kama danbeysta way kaladuwan yihiin, ka hubi dugsiyagaaga

Deeqaha waxbarasho ama deeqaha kale:

Waqtiga kama danbeysta way kaladuwan yihiin, ka hubi deeqda waxbarashada

Kuleejyo badan waqtigooda kama danbeysta ah waa Maarso 1 ama Abriil 1

Tilmaamo-Muhiim ah: kaydi diiwaanada aad adeegsato si aad u diyaariso FAFSA-gaaga haddii ay dhacdo inaad u baahato inaad xaqiijiso saxnaanta ama haddii aad leedahay cillad tignoolajiyadeed!

Waqtiyada kama danbeysta ah ee Habraaca

waqtiga kama danbeysta ah ee ardayda gelaaya kuleejka waa dayrta 2021

Ka codso oonleen www.fafsa.gov, ablikeeshinka MyStudentAid, warqad codsi ah, ama adoo wacaaya Xarunta Macluumaadka Kaalmada Ardayga ee Federalka (800) 433-3243



Soo qaado diiwaanadaan dhaqaalaha ee soosocda si aad u hubiso in hawsha codsigaaga loo fuliyo si dhaqso ah oo habboon

- Canshuur celinta hadii aad horey, sanadkii hore (buuxisay)
(2020 canshuur celinta 2022-2023 FAFSA)
- Lambarkaaga Amniga bulshada
- Foomamka W-2 Forms ee sanadkii hore
- Bayaanka Baanka ee hadda
- Diiwaanada dakhliga aan la canshuurin ee sanadkii hore
- Diiwaanada ganacsiga hadda iyo beerta
- Haddii aad tahay arday aan dhaqaale ahaan madax banaanayn, keen canshuur celintaada waalidka, iyo dhammaan kuwa kore
- Haddii aad guursatay (xaaskaaguna buuxisay canshuur celin gaar ah), keen canshuur celinta xaaskaaga, iyo dhammaan kuwa kore ku xusan

FAFSA-gaaga waxaa lagu sameyn doonaa dib u eegis waxaana warbixin elektarooniga ah loo diri doonaa kuleejka aad ku calaamadeysay FAFSA-gaaga. Warbixinta waxay xaqiijin doonaa xogta aad ku qortay FAFSA-gaaga waxaana kujiri doonaa Family Contribution (EFC, Tabaruaadka Qoyska ee la filayo).

Xog Muhiim ah!

FAFSA ee shabakada waxay u ogolaataa qoysaska inay kasoo dejiyaan macluumaadka cashuurta nidaamka IRS ayagoo adeegsanaaya Qalabka Soo Celinta Xogta.



Maalgelinta Waxbarashadaada: Tasmada Gargaarka Federaalka ee Ardayga ee ay Daabacday Waaxda Waxbarashada Maraykanka. Daabacaadaan waxaa ku qoran xog ku saabsan deeqaha federaalka, amaahda, iyo waxbarashada shaqada.

Está disponible en español a
<http://bit.ly/2xeAhul> o (800) 433-3243.

U qalmida Gargaarka Ardayga

Arrimo badan ayaa saameyn kara u qalmidaada gargaarka dhaqaalaha.

Xaalada ku tiirsanaanta ama ku tiirsanaan la'aan qof

Dhammaan ardayga waxaa loo arkayaa inay yihiin arday ku tiirsan ama aan ku tiirsanayn qof marka ay codsanayaan gargaarka dhaqaalaha. Ardayda waalidiinta ku tiirsan waa inay soo gudbiyaan xogta dhaqaalaha waalidka ee FAFSA. Xogtaan waa muhiim xataa haddii waalidku uusan dooneyn inuu bixiyo waxbarashada ardayga.

Waxaa si ootamaatiga ah loogu tixgelinayaa inaad tahay arday **Aan Qof ku Tiirsanayn** sanadka dugsiyeedka 2022-2023 haddii aad jirto 24 sano ama kasii wayn tahay marka la gaaro Diseembar 31, 2021. Haddii aad ka yar tahay 24 sano, waxaa lagu tixgelin doonaa inaad tahay arday aan qof ku tiirsanayn haddii aad tahay wax kamid ah kuwaan soosocda:



- Haddii aad tahay arday dhameeyay waxbarashada labaad ee jaamacada ama xirfadaha
- Hadaad guursatay
- Haddii aad haysato carruur ama dadka kale oo kugu tiirsan
- Hadaad ku jirto shaqada waajibaadka militarada
- Hadaad tahay halyeey kasoo shaqeeyay Ciidamada Maraykanka
- Hadaad tahay agoon ama haddii maxkamad ku daryeesho
- Hadaad kujirto xarunta korniinta waqti kasta, da'da 13 ama kasii wayn
- Kujira daryeel sharci ah ama xaalad yar oo xor ah marka loo eego taariikhda codsiga (ama dhalashada 18aad haddii uu degan yahay Minnesota)
- Haddii la go'aamiyo inaad tahay qof dhalinyaro ah oo guri la'aan ah lana wehlin

Hannaanka Rafcaanka: Haddi aad isleedahay waa in lagu tixgeliyo inaad qof madax banaan duruufo jiro oowgood, kala hadal maamulaha gargaarka maaliyada ee kuleejkaaga wixii ku saabsan "joojinta ku tiirsanaanta". Maamulaha gargaarka wuxuu adeegsan karaa go'aankiisa xirfadeed si uu u badelo heerkaaga ogana dhigo mid madax banaan asagoo ku saleynaaya xaalada qoyskaaga.

Waxyaabaha laga doonaayo Muwaadiniinta

Si ay u dhameystiraan FAFSA, ardaygu waa inuu yahay muwaadin ama qof u qalma oon muwaadin ahayn. Hase yeeshee, Ardayda aan dukumiintiyada haysan ee ku nool Minnesota waxay u qalmi karaan gargaarka dhaqaalaha gobalka ayadoo la raacaato Xeerka Barwaaqada Minnesota oo caadi ahaan loo yaqaan Xeerka Riyada Minnesota.

Ardayda ah muwaadiniinta Maraykanka ama kuwa aan muwaadiniinta ahayn ee u qalma, oo waalidkooda aysan haysan dukumiintiga sharciga ayaa codsan kara gargaarka dhaqaalaha federaalka ee ardayda ayagoo adeegsanaaya FAFSA. **Liis garee dhammaan eberyada waalidkaaga' lambarkaaga Amniga bulshada.**



Shaqada Fasalka

Hoos u dhaca ama kor u kaca tirada buundooyinkaaga halkii teeramba, waxay saameyn ku yeelan karaan gargaarka dhaqaalaha ee u qalanto inaad hesho. Xaafiiskaaga gargaarka dhaqaalaha ka hel xog dheeraad ah.

Wareejinta Dugsiga

Laanta gargaarka dhaqaalaha si ootamaatiga ah ardayda uma wareejiso kuleej kale. Ardaydu waa inay lasoo xiriiraan xafiiska gargaarka maaliyada ee kuleejka cusub si ay u go'aamiyaan tallaabooyinka ay tahay in la qaado si loo helo gargaarka. Ardaydu waa inay xaqiijiyaan inay haystaan FAFSA nooca elektarooniga ah ayna u diraan xarunta cusub ee waxbarashada. Gal barta www.fafsa.gov oo ku dar koodhka dugsiga ee machadka cusub si FAFSA sixid ugu sameyso.

Ardayda hela amaahda tooska ah, Amaahda PLUS ama Amaahda GAARKA AH waxay u baahnaan doonaan inay mar kale soo codsadaan. Ardayda ka qaybgaleysa oggolaanshaha shaqada ama Deeqda Daryeelka Ilmaha Minnesota waxay sidoo kale u baahan doonaan inay mar kale soo codsadaan. Haddii aad u wareegsato dugsi xoogaa qaali ah, waxaad xaq u yeelan kartaa inaad hesho gargaar dheeraad ah. La xiriir xaafiiskaaga gargaarka dhaqaalaha si aad u hesho xog.

Isbadelka Xaaladaha Dhaqaale

Mararka qaar waxaa yimaada isbadelo ku saabsan xaaladaha dhaqaalaha ardayda iyo qoysaska sababo la xariira xaaladaha gaarka ah, sida:

- Dhuminta shaqada
- Xanuun daran
- Naafonimo
- Kharashaad Caafimaad oo Badan
- Kala tag ama furniin
- Xubin kamid ah qoyska oo dhinta

Haddii wax kamid ah arrimahaan yimaadaan, waxaa isbadeli kara xaaladaada u qalmida gargaarka dhaqaalaha.

Haddii xogta aad ku gudbisay ee ku qoran FAFSA ama Codsiga Xeerka Riyada MN uu aad uga duwan yahay kan dakhligaaga iyo hantidaada hadda aad haysati, la xiriir xafiiskaaga kaalmada dhaqaale oo sharax xaaladaada. Marxalado gaar ah, maamulaha gargaarka waxa uu hagaajin doonaa xogta loo isticmaalo xisaabinta tabarucaada qoyska ee laga filaayo taas oo keeni karta kororka u qalmiitaanka gargaarka maaliyadeed ee ku salaysan heerka baahidaada dhaqaale ee dib loo eegay.

Majiraan Gunnooyin Canshuur oo la xariira Waxbarashada?

Ma jiraan Maalgashi iyo Dookhyo Lacageed oo laga Faa'iiday Cashuur?

Waxaa la heli karaa dookhyo iyo kayd canshuur oo la doorbidaayo si ay kaaga caawiyaan inaad sameyso kayd aadna iska bixiso waxbarashada dugsi sare kadib. Arrimahaan waxay si gaar ah qiimo u yeelanayaan haddii qoysku bilaabo inuu adeegsada markay carruurto yar yihiin.

Xogtaan soosocota looma tixgelin doono loomana tixgelin karo canshuur ama talo maalgelin. Lifaaqa xogta dheeraadka ah iyo/ ama macluumaadka xiriirka taleefanka ayaa raacaya mid kasta oo kamid ah xulashooyinka lasoo jeediyay. Qaar kamid ah dookhyada gunnooyinka ee la heli karo waxay saameyn ku yeelan karaan dookhyada kale. Sidaas oowgeed, Xaafiiska Waxbarashada Guud (OHE) wuxuu si adag kuugu dhiirigelinayaa inaad u gudbisno su'aalo gaar ah oo ku saabsan xaaladdaada maaliyadeed xirfadle ku takhasusay cashuuraha ama arrimaha maalgashiga.

Qorshaha Kaydka Kuleejka Minnesota

Qorshaha Kaydka Kuleejka Minnesota waa barnaamijka waxbarashada heerka sare ee Minnesota's 529. Inta badan gobaladu waxay bixiyaan ugu yaraan mid kamid ah qorshayaashaan lagu abuuray Qaybta 529 ee Xeerka Dakhliga Gudaha.


Qorshaha Minnesota waxa uu bixiyaa xulashooyin maalgashi oo kaladuwan kuwaas oo ku kaladuwan heerka khatarta illaa heerka habboonaan la'aanta iyo waliba xulasho si toos ah wax oga badelaya heerka khatarta ayada oo ku saleysan marka ka faa'iidaystaha la filaa inuu iska diiwaangeliyo shaqada dugsi sare kadib.

Dakhliga laga helo lacagaha lagu maalgeliyay qorshaha 529 aad waxay keenaan cashuur la'aan. Haddii qofka iska leh akoontada uu isticmaalo maalgelinta qorshaha 529 aad si uu ugu bixiyo kharashaadka waxbarashada sare ee uu u qalmo qofka akoonka iska leh, qaybta dakhliga ee miisaaniyada guud ahaan waxay noqon doontaa cashuur la'aan (marka laga reebo cashuuraha gobolka Minnesota ee soosocda).

Sharciga canshuur dhimista iyo shaqada federaalka ee soobaxay 2017 wuxuu balaariyay qeexitanaka federaalka ee "kharashyada ku baxa tacliinta sare ee tayada leh" si loogu daro illaa \$10,000 sanadkii kharashyada waxbarashada xanaanada-12.

Sharciga qoondada dheeraadka ah ee federaalka, 2020 oo la saxiixay Diseembar 2019 kii ayaa wax looga badelay qaybta 529 aad ee Xeerka Dakhliga Gudaha si loogu daro laba isticmaale oo cusub qorshaha 529 aad ee miisaaniyada. Dadka koonatada hadda haysta waxay isticmaalaan qorshaha 529 aad ee miisaaniyad si ay ugu bixiyaan qaar kamid ah kharashyada tabbarka ee diiwaangashan iyo sidoo kale inay dib ugu bixiyaan amaahda ardayda u qalma waxbarashada (iyo marxaladaha qaarkood, Amaahda ardayga ee walaalaha ka faa'iideysanaaya).

Hase yeeshee, gobolka Minnesota wuxuu doonayaa in la bixiyo cashuurta dakhliga gobolka ee qaybta dakhliga ee 529 aad ee miisaaniyada qorshaha ee loo adeegsado in lagu bixiyo kharashka waxbarashada xanaanada-12. Fadlan la tasho qorshahaaga 529 aad iyo/ama lataliye canshuur si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.



Koontada Kaydka ee Waxbarashada Coverdell

Koontada Waxbarashada Coverdell waa koonto ammaan ah ama gooni ah loona abuuray in lagu bixiyo kharashaadka waxbarashada sare ee loogu talagalay qofka leh akoonka. Coverdell ESA waxaa laga furan karaa bangi kasta ama shirkad kale oo ay IRS ansixisay.

Dakhligu wuxuu keena cashuur la'aan waxaana qaybinta loo isticmaali karaa kharashaadka dugsi hoose iyo dugsi sare iyo sidoo kale kharashyada waxbarashada dugsi sare kadib. Kharashaadka waxbarashada sare kaliya kama mid ahan kharashka tuushinka iyo lacaga dugsi, laakiin haddii ardayda la diiwaangeliyo ugu yaraan maalin barkeed, waxaa sidoo kale kujiraaya qolka iyo cuntooyinka. Waxaa jira xadidaado iyo dhaaftaano la xariira dakhliga, oo ay tahay in laga soo baxo kahor inta aan la furin akoonka.



Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan ka noqoshada IRA-yada iyo faa'iidooyinka cashuuraha kale waxaa laga heli karaa Adeegga Dakhliga Gudaha (IRS) Daabacaadda 970 oo laga heli karo www.irs.gov.



Koontada Kaydka Damaanada Waxbarashada


Lacagta la bixinaayo lagama jaraayo canshuurta, laakiin waxa laga yaabaa in laga saaro dhammaan ama qayb kamid ah lacagta dulsaarka lagu kasbaday taxanaha EE ee dakhliga marka aad soo furto damaanada si aad u bixiso waxbarashada dugsiga sare kadib iyo kharashaadka waxbarashada koowaad ee jaamacada iyo waxbarashada labaad ee jaamacada.

Kaydka damaanada Mareykanka ee u qalma waa damaanad EE taxane ah oo lasoo saaray Janaayo 1, 1990 ama kadib ama taxane I damaanad ah. Waxaa jira xadidaad dakhli iyo xadidaad heerka buuxinta canshuurta, oo saameeya gunnooyinka. Kharashaadka u qalmida kuma jiraan kuwa qolka iyo cuntooyinka.

Lacag kala bixida IRAs

Cashuur bixiyayaashu waxay lacagaha kala bixi karaan akoonada dhaqamada ama kan hawlgabka shakhsiga ah ee Roth (IRA) si ay u bixiyaan kharashaadka waxbarashada sare ayagoo aan bixin boqolkiiba toban cashuurta lacag bixin hore ee khusaysa lacag la bixida kahor inta aanu mulkiiluhu gaarin d'ada 59 1/2.

Kharashaadka waxbarashada sare kaliya kama mid ahan kharashka tuushinka iyo lacaga dugsiga, laakiin haddii ardayda la diiwaangeliyo ugu yaraan maalin barkeed, waxaa sidoo kale kujiraaya qolka iyo cuntooyinka.



Kaydka Kuleejka miyuu wax u dhimayaa Gargaarka Dhaqaale ee Ilmahaaga?

Gabi ahaanba maya! Waxay ku xiran tahay xaalada dhaqaale ee qoyskaaga. Adiga iyo ilmahaaga si gooni-gooni ah oga warbixiya dakhliga iyo lacagta guud (hanti oo laga jaray deymaha) marka aad qoraysaan Codsiga Bilaashka ah ee Gargaarka Ardayga ee Federalka (FAFSA) waana inaad u gudbisaan Waaxda Maraykanka ee qaabilsan Waxbarashada.




Qiimeynta Hantida

Waaxda Maraykanka ee qaabilsan Waxbarashada waxay qiimeynaysaa dakhliga qoyskaaga iyo lacagta guud si ay u go'aamiso Qoondada Qoyska ee la Filaayo, ama EFC. EFC-kaaga waxaa loo gudbinayaa Waaxda Waxbarashada kuleejyada lagu aqoonsaday codsiga.

Marka la go'aaminaayo EFC-gaaga, dawlada federaalka ma tixgeliso dhammaan hantida qoyska ee la heli karo si lagaaga bixiyo kuleejka. Tusaale ahaan, dakhligooda qorshaha hawlgabka, Sinaanta guriga ama sinnaanta ganacsiga yaryar waa laga saaray tixgelinta. Hantida kale ee ay leeyihiin oo ay kujiraan kaydka kuleejka waxa qayb ahaan dhowraaya kaydka waxbarashada iyo Gunnooyinka Ilaalinta Hantida. Gunnada ayaa korarta marba marka d'ada waalidku sii kordho.

Heerka qiimeynta hantida ardayga qof ku tiirsan waa 20 boqolkiiba, oo aan lahayn wax gunno dhowrid hanti ah. Tani waa sababta ay u jiri karaan faa'iidooyin muhiim ah oo waalidiinta ku qasbaaya inay yeeshaan akoonada kaydka kuleejka halkii ay carruurtooda ka yeelan lahaayeen.





Waa maxay dookhyada kaydka iyo maalgelinta?

Xog dheeraad ah oo ku saabsan faa'idooyinka canshuurta waxbarashada iyo dookhyada kaydka waxaa laga heli karaa Adeegga Dakhliga Gudaha (IRS) Daabacaadda 970 oo laga heli karo www.irs.gov.

Jadwalka A5: Kaydadka waxbarashada iyo Gunnooyinka Ilaalinta Hantida ee Waalidka

ee ku aadan foormulaha xaashida shaqada EFC (waalidiinta oo kaliya)
ee Sanadka Dugsiyeedka 2020-2021

Da'da markay taariikhdu ahayd 12/31/2021	Gunnada loogu talagalay labo waalid ama arday guursaday	Gunnada loogu talagalay hal waalid ama arday aan guursan	Da'da markay taariikhdu ahayd 12/31/2021	Gunnada loogu talagalay labo waalid ama arday guursaday	Gunnada loogu talagalay hal waalid ama arday aan guursan
25 ama kasii yar	\$0	\$0	46	6,300	2,400
26	400	100	47	6,500	2,500
27	700	300	48	6,600	2,500
28	1,100	400	49	6,800	2,600
29	1,500	600	50	7,000	2,700
30	1,800	700	51	7,100	2,700
31	2,200	800	52	7,300	2,800
32	2,600	1,000	53	7,500	2,900
33	2,900	1,100	54	7,700	2,900
34	3,300	1,300	55	7,900	3,000
35	3,700	1,400	56	8,100	3,100
36	4,000	1,500	57	8,400	3,100
37	4,400	1,700	58	8,600	3,200
38	4,800	1,800	59	8,800	3,300
39	5,100	2,000	60	9,100	3,400
40	5,500	2,100	61	9,300	3,500
41	5,600	2,200	62	9,600	3,600
42	5,700	2,200	63	9,900	3,700
43	5,900	2,300	64	10,200	3,800
44	6,000	2,300	65 ama kasii wayn	10,500	3,900
45	6,200	2,400	maran	maran	maran

Xeerka Riyada Minnesita

Ilaaha loogu talagalay Ardayda aan Sharciga lahayn

Bishii Maayo 2013, Xeerka Riyada MN (oo sidoo kale loo yaqaan Xeerka Barwaaqada) ayaa la saxiixay oo laga dhigay sharci. Ardayda aan sharciga lahayn oo kasoo baxa shuruudaha Xeerka Riyada MN waxay u qalmaan kharashka waxbarashada tuushinka ee gobalka, gargaarka dhaqaale ee sida gaarka ah loo maalgeliyo oo ay maamulaan kuleejyada dadwaynaha iyo jaamacadaha Minnesota, waxayna codsan karaan gargaarka maaliyada ee uu gobolka bixiyo. Ardayda gobalka Minnesota ee la siiyay Action Deferred for Childhood Arrivals (DACA, Oggolaanshaha Xeerka Dib u dhigaaya u Celinta Carruurta) ayaa sidoo kale laga yaabaa inay xaq u yeeshaan gunnooyinka. Sidoo kale waxaad xog dheeraad ah ka baran kartaa oo ku saabsan Xeerka Riyada MN iyo sida loo codsado gunnooyinka www.oh.state.mn.us/MNDreamAct.

Deeqaha Federaalka

Si aad u codsado uguna qalanto deeqda federaalka, waa inaad tahay muwaadin Maraykan ah, qof u dhashay Maraykanka ama qof aan muwaadin ahayn oo u qalma. Guud ahaan, waxaad tahay qof aan ahayn muwaadin oo u qalma haddii aad:

- Haysato degaanshaha rasmiga ah ee Maraykanka oo wata kaarka I-551C
- Xaalad jirto oowgeed ku heshay degaanshaha rasmiga ah ee wata kaarka I-551C
- Haysato Diiwaanka Imaanshaha Dalka (I-94) oo aad ka heshay Waaxda Amniga Dalka ayna ku qoran yihiin mid kamid ah arrimahaan: qaxooti, oggolaanshaha nabadgelyo doonka, a parolee, soo galootiga Cuban- Hatian, qof la kulmay xadgudubka ka ganacsiga dadka, ama qof haysta fiisa T-Visa.

Haddii aad tahay muwaadin ama qof aan muwaadin ahayn oo u qalma, waxaad u qalmi kartaa deeqaha federaalka xataa haddii waalidiintaadu aysan haysan dukumiintiga sharciga. **Marka aad buuxiso FAFSA, waxaad gelin kartaa dhammaan eberada ku yaala lambarada amniga bulshada ee waalidka.**

Deeqaha Gobolka

Haddii aadan ahayn muwaadin ama qof aan muwaadin ahayn oo u qalma, waxaad u xaq u leedahay inaad codsato deeqda Gobalka MN iyo barnaamijyada gargaarka ee gobalada kale haddii aad kasoo baxdo dhammaan shuruudaha Xeerka Riyada MN:

- Haddii aad dhigatay dugsiga sare ee Minnesota muddo dhan ugu yaraan 3 sanadood;
- Haddii aad ka qalin jabisay dugsiga sare ee Minnesota ama aadna GED-gaaga ku heshay Minnesota;
- Haddii aad iska diiwaangashan tahay Adeega Militariga (hadaad tahay nin jira 18-25 sano);
- Haddii aad codsaday xaaladda socdaalka sharciga ah marka uu diyaarka yahay nidaamka federaalka ee hawshaan (looma baahna maadaama nidaamka federaalku aanu hadda jirin).

Codsiga dhaqaalaha gobalka waxaa laga heli karaa: www.oh.state.mn.us/MNDreamAct. Haddii kale, ardaydu waa inay yihiin muwaadiniin Maraykan ah ama ay u qalmi karaan ayagoo ahayn muwaadiniin si ay codsadaan Deeqda Gobalka MN ayagoo adeegsanaya Codsiga Gargaarka Federaalka ee Ardayda (FAFSA).

Deeqaha Waxbarashada

Qaar kamid ah kuleejyada iyo jaamacadaha waxaa laga yaabaa in laga bixiyo deeqo waxbarasho oo loogu talagalay ardayda ayadoon laga eegayn xaalada soogalootigooda. La taliyayaal badan oo qaabilsan gargaarka maaliyada ayaa la socda oo u nugul xaaladdaada waxayna isku dayi doonaan inay kuu caawiyaan sida ugu wanaagsan ee macquulka ah. Ururo badan oo gaar loo leeyahay ayaa oonleenka kusoo daabaca deeqaha waxbarashada. Xog badan oo ku saabsan deeqahaan waxbarasho waxaad ka heli kartaa bartaan: www.oh.state.mn.us/MNDreamAct.

Siyaasadaha Tuushinka

Ardayda kasoo baxa shuruudaha Xeerka Riyada MN waxay u qalmaan kharashka waxbarashada tuushinka ee laga bixiyo kuleejtada iyo jaamacadaha dadwaynaha Minnesota. Kuleejkaaga ama jaamacadaada waxay ku tusin kartaa dukumiintiyada muujinaaya inaad kasoo baxday shuruudaha.

2

Codsi bilaash ah oo loogu talagalay Gargaarka Federaalka ee Ardayda (FAFSA) iyo Xeerka Riyada Minnesota

Xaafiiska Waxbarashada Sare ee Minnesota
1450 Energy Park Drive, Suite 350
Saint Paul, MN 55108-5227

Teleefanka: 651.642.0567 ama 800.657.3866
Isgaarsiinta Dadka Maqalka naafada ka ah:
800.627.3529
Fakiska: 651.642.0675

limaylka: info.ohe@state.mn.us

www.selfloan.state.mn.us
www.ohe.state.mn.us

©2021 Xaafiiska Waxbarashada Sare ee Minnesota